

# *Dhallinyarada, Doorashooyinka iyo Dimuquraadiyeynta:* **Doorashooyinka dalka ka dib**

UNFPA

FBA

Dhallinyarada, Doorashooyinka iyo Dimuquraadiyeynta:
Doorashooyinka dalka ka dib

# Erayga Wasiirka



**Md. Xil. Maxamed Bare Maxamuud**
**Wasiirka dhallinyarada iyo Ciyaaraha – Dowladda Federaalka Soomaaliya.**

**ANIGOO AH WASIIRKA** Dhallinyarada iyo Ciyaaraha, waxaan garwaaqsanahay ka-qaybgalka wanaagsan iyo howl-galinta dhallinyarada ee ku aaddan dhammaan shirarkii la qabtay ee ku saabsanaa dhallinyarada, doorashooyinka, iyo dimuqraadiyeynta kuwaas oo ay soo qaban-qaabiyeen hay'adda Sanduuqa Dadwaynaha ee Qaramada Midoobay (UNFPA) iyo hay'adda dowladda Iswiidhan ee nabadda, amniga iyo horumarinta (FBA). Waa arin bogaadin mudan in aan markhaati ka noqdo dhallinyaro rag iyo dumarba leh kuwaas oo ka kala yimid dhammaan daafaha Soomaaliya oo si firfircoon uga qayb qaadanaya qaabeynta mustaqbalka dimuquraadiyadeed ee qarankeena.

Waxaan kamid ahay, anigo ku faraxsan, xildhibaanada dhallinayarada ah ee baarlamaanka federaalka Soomaaliya anigoo matalaya bulshada da'da yar ee firfircoon, tamartana leh. Sanadihii ugu dambeeyay waxaa jiray sare u kac la dareemi karo oo ku yimid tirada dhallinyarada ah ee sida firfircoon uga qayb qaadanaysa arimaha siyaasadda ee heer qaran iyo mid dowlad goboleedba. Ayadoo ay jiraan caqabado badan oo ay wajahayaan dhallinyarada Soomaaliyeed, ayna kamid yihiin kuwo bulsho, dhaqaale, iyo siyaasad, waxaase naga go'an inaan codadkeenna ka dhigno mid la maqlo oo aan isbeddel togan ka samayno dalkeenna.

Siyaasadda Qaran ee Dhallinyarada Soomaaliyeed (2022-2030), oo diiradda saaraysa awoodsiinta dhallinyarada ee ka qeybgalka geeddi-socodka dimuqraadiyaynta, waxay hagaysaa hanaanka ka qaybgalka dhallinyarada ee siyaasadda dalka.

Waxaa lagama maarmaan u ah dhammaan jilayaasha inay qiraan kaalinta dhallinyaradu ka ciyaaraan qaabeynta dimuqraadiyadda iyo inay xaqiijiyaan in dhallinyaradu matalaad leeyihiin marka go'aanno noloshooda saameynaya la gaarayo.

Sida lagu sheegay talooyinkii madasha, hay'adda xeer dajinta iyo guddiyada doorashooyinku waa inay ka shaqeeyaan sidii ay dhallinyaradu ula falgali lahaayeen qorshaynta, fulinta, iyo kormeerka hannaanka doorashooyinka si loo xaqiijiyo daah-furnaan loo dhan yahay. Odayaasha dhaqanka ayaa sidoo kale kaalin weyn kuleh taageeridda sidii loo ciribtiri lahaa nidaamka 4.5 iyo in dhallinyaradu helaan fursad ay uga qeyb galaan doorashooyinka.

Wasaaradda dhallinyarada iyo ciyaaraha waxaa ka go'an inay fuliso talooyinkii ay madashu soo jeedisay. Wasaaraddu waxay qiraysaa muhiimadda ay leedahay awoodsiinta dhallinyarada iyo in aragtidooda lagu daro geeddi-socodka go'aan-gaarista ee qaabayn doona mustaqbalka qarankeena. Annagoo kaashaneyna saamileeyda heer kasta, waxaan ku dadaaleynaa in aan abuurno nidaam doorasho oo loo wada dhanyahay lagana wada qeybgalo, kaasoo ka turjumaya himilooyinka dhammaan dadka Soomaaliyeed, ayadoon loo eegeyn da'dooda.

Aynnu horseedno ka qaybgalka dhallinyarada ee hannaanka dimuqraadiyadda ee dalkeenna. Tamartooda, afkaartooda, iyo xamaasaddoodu waa raasamaal qiimo wayn oo ay waajib tahay in loo adeegsado dhisidda mustaqbal yabooh wacan oo ifaya oo ay Soomaaliya gaadho.

Wada jirkeenna waxaynu ku dhisi karnaa bulsho qof walba codkiisa la maqlo, aragti walbana la qiimeeyo, qof kastana la awood siiyo si uu u qaabaysto aayahiisa. Soomaaliya oo nabad iyo badhaadhe ah waynu gaadhi karnaa waana suurgal.

# Tusmada Warbixinta

**Mahadnaq** ..... **7**
**Dulmar guud** ..... **8**
**Hordhac** ..... **10**
Dowlad Goboleedka Puntland, 19 – 21 March 2022 ..... 12
Dowlad Gobleedka Galmudug, 21 – 23 June 2022 ..... 13
Dowlad Goboleedka Jubaland, 16 – 17 August 2022 ..... 14
Gobalka Banaadir, 27 – 29 November 2022 ..... 15
Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed, 6 – 8 February 2023 ..... 16
Dowlad goboleedka Hirshabelle, 29 April – 1 May 2023 ..... 17
Madasha heer qaran ee dhallinyarada, doorashooyinka iyo dimuqraadiyaynta ..... 19
Maxay tahay sababta ay dhallinyaradu uga qeyb qaadanayaan hannaanka doorashada? ..... 20
1. Tirikoobka Dadka (demographics) ..... 20
2. Dimuqraadiyadda iyo Xuquuqda Aadanaha ..... 20
3. joogteynta (Sustainability) ..... 21
Heerka ka qaybgalka doorashooyinka ee dhallinyarada Soomaaliyeed ..... 22
**Natiijooyinkii shirarka** ..... **23**
Caqabadahaas waxaa ka mid ah: ..... 23
Caqabado u gaar ah Gabdhaha dhallinyarada ah ..... 24
**Taloooyin** ..... **27**
Ballanqaadyo u gaar ah dowladgoboleed kasta ..... 30
Dowlad goboleedka Puntland: ..... 30
Ballanqaadka Dowladda: ..... 30
Balan qaadyadii ay sameeyeen Qaramada midoobay iyo ha`ayadaha aan dowliga aheyn ee caalimaga ah: ..... 30
Ballanqaadyada guddiga ku meelgaarka ah ee Doorashooyinka Puntland (TPEC, oo hadda loo bixiyay Guddiga Doorashooyinka Puntland -PEC) : ..... 30

Dowlad goboleedka Galmudug: 31
Balanqaadka Dowladda: 31
Balanqaadka Hay'adda Qarama Midoobay iyo hay'adaha aan dowliga aheyn ee caalamiga ah: 31
Balanqaadka Odayaal dhaqameedka: 31
Dowlad Gobleedka Jubaland: 32
Balanqaadka Dowadda: 32
Balanqaadka Hay'adda Qaramada midoobay iyo hay'adaha aan dowliga aheyn ee caalamiga ah: 32
Balanqaadka Odayaal dhaqmeedka: 32
Goboolka Benadir: 33
Balanqaadka xagga dowladda: 33
Balanqaadka Hay'adda Qaramada Midoobay iyo Hay'adaha aan Dowliga aheyn ee Caalamiga ah: 33
Dowlad goboleedka Koonfur galbeed: 34
Ballanqaadka Odayaal dhaqameedka: 34
Balanqaadka Dowladda: 34
Dowlad Goboleedka Hirshabeelle: 35
Ballanqaadka Odayaal dhaqameedka: 35
Ballanqaadka dowladda: 35



# Mahadnaq

**WAXBIXINTAN KU SAABSAN** ka qeybgalka dhallinyarada ee dimuqraadiyaynta dalka Soomaaliya waxaa diyaariyay hay'adda FBA (Folke Bernadotte Academy- FBA waa hay'adda dowladda Iswiidhan ee nabadda, amniga iyo horumarinta.) iyadoo kaashanaysa hay'adda Qaramada Midoobey ee Sanduuqa Horumarinta Dadweynaha (United Nations Population Fund-UNFPA). Warbixintan waxay koobaysaa nuxurka doodo si taxane ah oo lagu qabtay dhammaan dowlad goboleedyada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya ayna soo qaban-qaabiyeen Ururrada Bulshada Rayidka iyo ururro ay hogaamiyaan dhallinyaro Soomaaliyeed intii u dhaxaysay 2022 -2023. FBA iyo UNFPA waxay shirarkaas ka taageereen dhanka dhaqaalaha iyo saadka, balse doorka ugu muhiimsan waxaa lahaa ururrada deegaanka[1]. Ururadan waxay isu keeneen hormuudkii bulshada oo ay kamid ahaayeen dhalinyaro, wakiillo dowladeed, odayaal dhaqameed, iyo ururro heer qaran iyo heer caalami ah. FBA iyo UNFPA waxay uga mahadcelinayaan dhammaan kasoo qeyb-galayaasha dedaalka iyo khibradda ay bixiyeen kuwaasoo qeyb-weyn ka qaadanaya dimuqraadiyadda Soomaaliya. Waxaana muhiiim ah isla markaana aan halkaan ku caddaynaynaa in dhammaan aragtiyada ku qoran warbxintan ay ka yimaadeen dhallinyaradii ka koobnayd ragga iyo dumarka ee ka qeyb-qaatay doodihii la qabtay kuna cabbiray fikirkooda caqabadaha ka hortaaagan ka qaybgalka hannaanka go'aan-gaarista ee siyaasadda iyo sidii sare loogu qaadi lahaa fursadaha ka qeyb galka siyaasadda. Warbixinta kama turjumayso aragtida rasmiga ah ee FBA iyo UNFPA.

[1] Xarunta Cilmi Baarista iyo Horumarinta Puntlan (PDRC), , Daladda ururrada dhalinyarada Puntland (PYAN), Ururuka Dhalinyarada Mutadawiciinta Soomaaliyeed (SOYVA), Tubta Nabadda Soomaaliya (SPL), Ururka Midnimada Haweenka Soomaaliyeed (SWSO), Dalladda ururada dhallinyarada (GYAN), Horn Center, Hogaanka dhallinyarada Hirshabelle, Ururka dhallinyarada Gobolka Banaadir (BRYA) and Xarunta Nabadda ee Elman (EPC).

# Dulmar guud

**SANADIHII 2022 IYO 2023**, Ururrada Bulshada Rayidka ee ka howl-gala dhammaan dowlad goboleedyada xubnaha ka ah dowladda federaalka Soomaaliya ayaa qabtay kulamo diiradda lagu saarayo dhallinyarada, doorashooyinka, iyo dimuqraadiyeynta, iyadoo xoogga la saarayo ka qaybgalka siyaasadeed ee dhallinyarada ee doorashooyinka dowlad goboleedyada iyo dowladaha hoose. Kulamadan waxay ka koobnaayeen maalin loo gaar yeelay/qabtay dhalinyarada dumarka ah, maalin wiilasha iyo gabdhahaba ka wada qayb qaateen, iyo maalin dood wadaag ah oo ay kasoo wada qeyb-galeen saamiley kala duwan, ayna kamid ahaayeen dhalinyaro, iyo dadka leh awoodda fulinta si looga wada hadlo hababka sare loogu qaadi karo ka-qaybgalka dhallinyarada ee doorashooyinka. Doodahan waxaa lagu qabtay dhammaan dowlad-goboleedyada iyo gobolka banaadir, waxaana hogaaminayay isla markaana fududeeyay hay'adaha maxalliga ah, ayna kamid yihiin kuwa dhalinyaradu hogaamiyaan, waxaana taageero siinayay hay'adaha FBA iyo UNFPA.

Ujeeddooyinka ugu mudan ee hindisahan wuxuu ahaa sare u qaadista is-fahanka iyo hormarinta qorshaha sare loogu qaadayo ka qaybgalka dhallinyarada Soomaaliyeed ee siyaasadda dalka, iyo xoojinta wadashaqeynta ka dhexeysa daneeyayaasha ku howlan dimuqraadiyeynta dalka.

In kastoo dhallinyaradu yihiin tirada ugu badan ee dadka Soomaaliyeed (81% bulshada Soomaaliyeed waxay ka yar yihiin 35 sano),[2] haddana dhallinyaradu waxay isu arkaan in laga qadiyay ka qayb galka doorashooyinka rasmiga ah ee dalka. Inta badan dhallinyaradii ka qeyb-qaadatay doodahii la qabtay waxay xoogga saareen caqabadaha sida gaarka ah u haysta dumarka dhallinyarada ah, taasoo ay sabab u tahay siyaadadda Soomaaliya oo ay hogaamiyaan raggu, ayna markasta ka saaraan dhalinyarada gaar ahaan dumarka kasoo jeeda bulshada la hayb-sooco. Ka qeyb-galayaashu waxay tilmaameen caqabadaha ka hortaagan ka qeyb-galka dhallinyarada ee doorashooyinka inay saamasaysay ugana sii dartay arrimaha la xiriira qabiilka, jinsiga, da'da, heerka waxbarasho, iyo heerka nolosha qofka.

[2] Siyaasadda Qaran ee Dhallinyarada (2023 – 2030)

Si wax looga qabto caqabadahan, ka qaybgalayaasha madashu waxay soo saareen talooyin wax ku ool ah, loogana golleeyahay kordhinta ka qayb galka doorashooyinka dhallinyarada Soomaaliyeed isla markaan ay usoo bandhigeen saamilayda ay khuseyso. Waxay ugu baaqeen dowladda inay yarayso lacagta diiwaan-galinta dhallinyarada doonaya inay ka qeyb-galaan siyaasadda, in qoonda gaar ah looga sameeyo kuraashta goleyaasha degmooyinka iyo baarlamaanka, iyo in dhallinyaradu matalaad ku yeeshaan guddiyada doorashooyinka qaranka. Waxay sidoo kale ku boorriyeen odayaal dhaqameedyada inay taageeraan baabi'inta hannaanka awood qaybsiga ee 4.5 iyo inay dhallinyaradu xuquuq ku yeeshaan hannaanka doorashada ee dalka. Iyadoo taas laga jawaabayo, dhammaan daneeyayaashu waxay ballan-qaadeen inay tallaabo qaadayaan si kor loogu qaado fursadaha ay dhallinyaradu uga qayb gali lahaayeen geedi-socodka doorashooyinka.

Inta badan dhallinyaradii, odayaashii, wakiilada dowladda iyo saamilaydii kale ee madasha ka soo qayb galay waxay bogaadiyeen habka barnaamijkan loo agaasimay, iyagoo sheegay inay tahay madal gaar ah, kulmisayna jiilal kala duwan si ay uga wada hadlaan xoojinta kaqeyb-galka dhallinyarada ee hannaanka go'aan gaarista heer qaran iyo heer deegaanba. Waxay sheegeen in isdhexgalka jiilalka kala duwan uu sare u qaadayo fahanka aragtida iyo hab nololeedka ay qolo walba soo martay in kastoo hal bulsho ka wada tirsan yihiin.

Inta badan dhammaan saamilleydu waxay adkeeyeen baahida loo qabo in la dhiso golayaal dheeraad ah, laguna gorfeeyo is dhexgalka jiilalka kala duwan ee ku saabsan go'aan-gaarista wadar-ogolka ah. Sidoo kale, waxay caddeeyeen baahida looqabo sii hormarinta awoodda hogaaminta golayaasha wax lagu gorfeeyo.



# Hordhac.

**SI WAX LOOGA QABTO CAQABADAHA** ay la kulmaan dhallinyarada Soomaaliyeed ee la xiriirta ka qaybgalka siyaasadda[3], FBA oo kaashanaysa UNFPA iyo hay'ado kale, waxay dowlad goboleed kasta iyo gobolka Banaadir ka qaban-qaabiyeen doodo taxane ah. Doodahan waxaa looga gollahaa sare u qaadidda ka qayb galka dhallinyarada Soomaaliyeed doorashooyinka, waxaana ka soo qayb galay saamileyda heer federaal, heer dowlad goboleed, maamullada degmooyinka, ururrada ay hogaamiyaan dhalinyarada Soomaaliyeed iyo ururro caalami ah oo ay shaqo wadaag yihiin.

Ujeeddooyinka ugu muhiimsan ee hindisahan wuxuu ahaa sare u qaadista fahanka, iyo xeeladaha sare u qaadidda ka qeyb-galka dhallinyarada ee arrimaha siyaasadda, iyo xoojinta xiriirka ka dhaxeeya saamileyda daneysa arrimaha dhallinyarada, doorashooyinka iyo dimuquraadiyeynta Soomaaliya. Diiradda shirarka ayaa ahaa in xoogga la saaro ka

[3] Qaraarka 2250 wuxuu "dhalinyarada" ku qeexayaa dadka da'doodu u dhaxayso 18–29 sano. Si kastaba ha ahaatee, Soomaaliya waxay ku qeexdaa dhallinyarada inay u dhaxayso 15 ilaa 35 sanno jir (Barnaamika Siyaasadda Dhallinyarada soomaaliyeed 2023 – 2030). Dhammaan dhallinyaradii ka qaybgashay fagaarayaasha doodaha waxay kaweynaayeen 18 sano, waxayna ubadnaayeen inta u dhaxaysa 18 – 29. Warbixintan waxaa loogu adeegsaday ereyada "Dhallinyarada" iyo "dadka da'da yar" si iskumid ah, waxaana loola jeedaa ragga iyo dumarka dhalinta ah.

qayb galka dhalinyarada ee doorashooyinka maamul goboleedyada iyo deegaannada, doorashadii guud ee dalka kadib.

Ururrada Maxaliga ah, oo ay ka mid yihiin  kuwa dhallinyaradu hogaamiyaan, waxay qaateen doorka ugu muhiimsan ee nidaaminta iyo isku dubbaridka dhammaan shirarkii la qabtay iyagoo taageero ka helayay hay'addaha FBA iyo UNFPA. Qaban-qaabiyayaashu waxay yeesheen kulamo qorsheyn ah, si loo xaqiijiyo in kulamada la qabanayo la tixgaliyo deegaan kasta iyo xaaladdiisa khaas ka ah, si loo hubiyo lahaanshaha deegaanka ee hindisaha. Habkan wuxuu muhiim u ahaa maadaama uu jiro kala duwanaansho u dhexeeya dowlad goboleeyada xagga geeddi-socodka dimuqraadiyaynta.

Shirarkan waxa ay ka koobnaayeen maalmo aqoon-iswaydaarsi  ah oo loo samaynayay dhallinyarada ragga iyo dumarka ah, iyo maalmo ay kasoo qeyb galeen saamilay kala duwan. Waxaa si gaar ah loogu qabtay kulan gabdhaha dhallinyarada ah si loogu abuuro jawi ay ku soo bandhigi karaan caqabadaha gaarka u ah gabdhaha ee ka hor taagan ka qeybgalka doorashooyinka. Kulamada wadajirka ah ee gabdhaha iyo wiilasha dhallinarada wuxuu abuuray fursad aragti-wadaag ah.

Maalinta saddexaad, dhallinyarada, wakiillada dowladda iyo saamiley kala duwan ayaa ka qayb galay kulan wadareed lagu gorfaynayay hababka sare loogu qaadi karo ka qaybgalka dhallinyarada ee doorashooyinka.

Qiyaastiii 100 dhallinyaro ah ayaa ka qeyb-qaatay dood-wadaag kasta, iyadoo la eegayay isu-dheellitiranka xagga jinsiga, iyo matalaadda qeybaha kala duwan ee bulshada heerarkeeda iyo deegaannada. Nasiib darro, sababo la xiriira dhankaamniga, qaar kamid ah bulshada daggan degmooyinka fog-fog ayaa awoodi waayay inay kasoo qeyb-galaan kulamada.

Intii lagu guda jiray kulamda aragti-wadaagga, kasoo qeyb-galayaashu waxay ka doodeen aragtiyada ugu muhiimsan ee doorashooyinka, iyagoo isla lafa guray habka ay dhallinyaradu uga qeyb noqon karaan hanaanka doorashooyinka dalka ( ka hor doorashada, inta lagu guda jiro iyo doorashada kadib intaba),  waxayna qeexeen ama isla meel dhigeen caqabadaha kala duwan ee ka haysta dhallinyarada ka qayb galka doorashooyinka.

Si guud, shirarkii dhacay iyo aragtiyihii la wadaagayba waxay xoogga saarayeen awood siinta dhalinyarada iyo muujinta doorkooda hogaamineed, iyo inay ka qeyb-qaataan hannaanka siyaasadeed ee dalka. Hindisaha isu keenista dhammaan daneeyayaasha wuxuu salka ku hayay in la dhiirrigeliyo isku xirka iyo iskaashiga dimoqraadiyaynta Soomaaliya.

 

## Dowlad Goboleedka Puntland, 19 – 21 March 2022

**MADASHII LAGU QABTAY PUNTLAND**, Garoowe, oo ay qaban-qaabadiisa lahaayeen xarunta cilmi baadhista iyo horumarinta Puntland(Puntland Development and Research Center-PDRC) iyo Daladda ururrada dhallinyarada Puntland (Puntland Youth Association Network -PYAN). Waxaa kasoo baxay qodobo dhowr ah oo muhiim ah iyo balan qaadyo. Qodabbada muhiimka ah ee kasoo baxay waxaa kamid ahaa:

Ballanqaadyadaas waxay muujiyeen diyaarsanaan ay sameeyeen dowladda iyo guddiga doorashooyinka si wax looga qabto caqabadihiii ka soo baxay madasha iyo abuurista fursado ay dhallinyaradu kaga qayb-galaan hannaan siyaasadeedka Puntland. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan eeg bogga 30.

- Dowladda waxay go'aansatay inay samayso hindise sharciyeed lana horgeeyo baarlamaanka Puntland, kaasoo u abuuraya dhallinyarada fursad isla markaana xoojinaya ka qeyb-galkooda siyaasadda, iyo inay wax ku yeeshaan hannaanka go'aan gaarista.
- Dowladda waxaa ka go'an inay dibu-eegis ku samayso isla markaana sare u qaado qorshaha siyaasadda dhallinyarada , kuna darto barnaamijyada hortabinta u leh dhallinyarada, ayna kamid yihiin ka qeyb-galkooda doorashooyinka.
- Guddiga Ku-meel-gaarka ah ee Doorashooyinka Puntland (haddana loo bixiyay Guddiga Doorashooyinka Puntland) waxaa ka go'an inay daah-furaan olole lagu diiwan-galinayo cod bixiyayaasha dhammaan deegaannada Puntland. Ujeedka ololahan ayaa ah fahanka muhiimadda uu geedi-socodka doorashadu u leeyahay dhallinyarada iyo in la baro bulshada marxaladaha kala duwan ee doorashada.



## Dowlad Gobleedka Galmudug, 21 – 23 June 2022

**MADASHII LAGU QABTAY** Dhuusamareeb, Galmudug, ayna qaban-qaabadiisa lahaayeen hay'adda Horn Center iyo dalladda urarrada dhallinyarada ee Galmudug (Galmudug Youth Association Network GYAN). Waxaa kasoo baxay qodobo dhowr ah oo muhiim ah iyo ballan qaadyo. Qodabada muhiimka ah ee kasoo baxay waxaa kamid ahaa:

- Wasaaradda dhallinyarada iyo Ciyaaraha ee galmudug ayaa ballan qaaday inay sii wadi doonaan hubinta in dhallinyarada lala tashado isla markaana laga qayb galiyo dhammaan qorsheyaasha dowladda galmudug ee saameynta ku leh dhallinyarada. Ballanqaadkan waxa uu ka tarjumayaa qirista muhiimadda ay leedahay ka-qaybgalinta dhallinyarada iyo in lagu soo daro hanaanka go`aan qaadashada.
- Odayaal dhaqameedka waxaa ka go'an inay u tixgaliyaan dhallinyarada saamilay ama jilayaal lagama maarmaan u ah doorashooyinka, iyo inay siiyaan fursad ay uga qeyb-galaan madalaha ay qebyta ka yihiiin hogaamiyaasha bulshada, kuwa diinta, iyo kuwa leh awoodda fulinta. Ballan qaadkan ujeedkiisu waa in dhallinyaradu helaan matalaad siman dhanka hannaanka go'aan ka gaarista arrimaha muhiimka ah, iyo muhiimadda ay leedahay in codkooda la maqlo.
- Qaramada Midoobay (QM) waxay ballanqaadeysaa inay taageereyso ajandeyaasha kala duwan ee dowladda iyo arimaha hor-tabinta u leh, gaar ahaan kuwa la xiriira ka qeybgalka dhallinyarada ee hannaanka doorashooyinka. Ballan qaadkan wuxuu muujinayaa dedaalka QM iyo taageerada ay siinayso dowlad goboleedka Galmudug sidii kor loogu qaadi lahaa ka-qaybgalka siyaasadda ee dhallinyarada.

Ballanqaadyadaas waxay u abuurayaan dhallinyarada fursado ay bulshada wax kusoo kordhiyaan, qaataanna door muhiim isla markaana kaalin weyn ku yeeshaan qaabeynta mustaqbalka gobolka. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan eeg bogga 31.





## Dowlad Goboleedka Jubaland, 16 – 17 August 2022

**MADASHII LAGU QABTAY** Kismaayo, Jubaland, ayna qaban-qaabisay hay'adda Ururka Midnimada Haweenka Soomaaliyeed (SWSO). Waxaa kasoo baxay qodobo dhowr ah oo muhiim ah iyo balan qaadyo. Qodabbada muhiimka ah ee kasoo baxay waxaa kamid ahaa:

Go'aannadan wax ku oolka ah waxay ka turjumahayaan ka go'naanshaha dowladda , odayaal dhaqameedka, iyo hay'adda Qaramada Midoobay inay sare u qaadaan ka qeybgalka dhallinayarada hannaanka siyaasadeed ee dowlad goboleedka Jubaland. Wixii faahfaahin dheere ah, fadlan eeg bogga 32.

- Dowladda waxay balanqaaday inay diyaariso fursad dhalinyaradu uga faa'iidaysan karaan inay ka qeyb qaataan arimaha madaniga, dimuqraadiyadda, iyo nabadaynta. Ballan qaadkan wuxuu garwaaqsanayaa muhiimadda ay leedahay in la abuuro jawi ammaan ah oo ku habboon loona dhanyahay, dhallinyaraduna ay qeyb ka noqon karaan , waxna ka geysan karaan.
- Odayaal dhaqameedyadu waxay ballanqaadeen inay xaqiijiyaan in dhallinyarada la siiyo fursad ay uga qeyb qaataan doorashooyinka tooska ah. Waxay kaloo qirayeen doorka hogaamineed ee dhallinyarada, waxayna ballanqaadayaan inay sii wadayaan wadahadalka u dhexeeya jiilalka kala duwan si loo yareeyo kala duwanaanshaha ay keentay da'du. Ujeedka ballanqaadkan waa in sare loo qaado hirgalinta siyaasad loo dhan yahay.
- Hay'adda Qaramada Midoobay (QM) waxay u qoondaysay taageero dheeraad ah hindisayaasha ay dhallinyaradu hogaamiyaan, gaar ahaan kuwa dhiirri galinaya ka qeyb galka dhallinyarada ee arrimaha doorashooyinka iyo madaniga. Ballanqaadkan wuxuu hoosta ka xarriiqayaa taageerada hay'adda QM ee hindisayaasha awood siinaya dhallinayarada inay qeby ka noqdaan habka go'aan gaarista dalka.



## Gobalka Banaadir, 27 – 29 November 2022

**KULANKII LAGU QABTAY** Muqdisho, gobolka Banaadir, iyadoo la kaashanayo urur-ka Maamulka Dhalinyarda Gobolka Banaadir ( BRYA) iyoa Xarunta Nabadda ee Elman ( EPC), waxaa ka soo baxay go'aano iyo ballanqaadyo muhiim ah. Waxaana kamid ahaa:

Ujeedada ballanqaadkan waa abuurista jawi loo dhanyahay, lagana wada qeyb qaadanayo si dhallinyaradu door ugu yeeshaan hormarinta iyo dowlad-dhiska Soomaaliya. Wixii macluumaad dheeraad ah ee laxiriira go'aannada iyo ballanqaadyada ee madasha, Wixii faahfaahin dheeri ah, fadlan eeg bogga 33.

- Baarlamaanka Fadaraalka Soomaaliya wuxuu ballan qaadayaa inuu u ololeeyo ka qeyb galka dhallinyarda dhammaan heerarka kala duwan ee hogaaminta dalka. Ka go'anaanshahan wuxuu muujinayaa fahanka muhiimadda ay leedahay ka qeybgalka dhallinyarada ee hannaanka go'aan gaadhista dalka iyo inay ku lug yeeshaan hogaaminta siyaasadeed.
- Dowladdda Federaalka waxaa ka go'an inay si dhow ula shaqeyso dhallinyarada, dhagaysatana dareenkooda ama cabashadooda. Ballanqaadkan wuxuu cadaynayaa ka go'naanshaha dowladda inay la shaqeyso dhalinyarada si looga jawaabo baahidooda iyo himilladooda.
- Hay'adda Qaramada Midoobday ( QM), waxay ballanqaadaysaa inay sii wado taageerada shirarka ama madallada noocaan ah, si gaar ah kuwa dhallinyaradu ay hogaaminayaan, kuwaasoo keenay inay dhallinyaradu isu yimaaddaan, fikirkooda cabbiraan, awooddooda dhisaan si ay ula xisaabtamaan dadka shuruucda dalka sameeya. Ballanqaadkan wuxuu muujinayaa ka go'naanshaha QM ee awoodsiinta dhallinyarada, si codkooda loo maqlo, looguna daro aragtidooda marka la samaynayo shuruucda dalka.







# Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed, 6 – 8 February 2023

**MADASHII LAGU QABTAY** Baydhabo, Koonfur galbeed, iyadoo la kaashanayo haya`adda tubta nabadda Soomaaliyeed ee (Somali Peace Line -SPL) iyo Ururuka Dhalinyarada Mutadawiciinta Soomaaliyeed ee (Somali Youth Volunteer Association -SOYVA), waxaa ka soo baxay go'aanno iyo ballan qaadyo muhiim ah. Waxaana kamid ahaa: Go'aamadan waxay caddaynayaan wada shaqeynta ka dhexeaysa Odayaal dhaqameedka, xubnaha baarlmaanka iyo dowladda oo ah in sare loo qaado ka qeybgalka dhalinyarada ee arimaha siyaasadda. Wixii faahfaahin dheeri ah, fadlan eeg bogga 34.

ballanqaadeen iney la shaqeeyaan dhalinayarada, iyo inay si siman ula wada dhaqmaan iyadoon la eegaynin da'da ama jinsiga. Waxay samaynayaan siyaasad furfuran taasoo ogolaanaysa in dhallinyaradu cabbiraan afkaartooda, kana qeyb qaataan hannaanka go'aan gaarista. Ballanqaadkani waxa uu xoojinayaa in dhallinyarada gobolku helaan matalaad iyo siyaasad loo dhanyahay.

- Xubnaha Baarlamaanka ee Koonfur galbeed, waxay ballan qaadayaan xoojinta iskaashiga ka dhexeeya baarlamaanka iyo dhallinyarada. Ballanqaadkan wuxuu caddaynayaa muhiimadda ay leedahay in dhallinyaradu qeyb ka noqdaan hanaanka siyaasadda deegaanka, iyo ka go'anaanshahooda inay si dhow u wada shaqeeyaan dhallinyardada iyo baarlaamaanku.
- Dowladdu waxay ballanqaadaysaa awoodsiinta dhallinyardad iyo dhisidda aqoontooda iyo inay qeyb ka noqdaan doorashooyinka golaha degmooyinka. Ballanqaadkani waxa uu ka tarjumayaa aqoonsiga baarlamaanka ee muhiimadda ay leedahay in dhallinyaradu ka mid noqdaan hababka go'aan gaarista iyo ka-qaybgalkooda firfircoon ee doorarka hoggaaminta siyaasadda.



# Dowlad goboleedka Hirshabelle, 29 April – 1 May 2023

**MADASHII LAGU QABTAY** Jowhar, Hirshabelle, iyadoo la kaashanayo haya`adda tubta nabadda Soomaaliyeed ee (Somali Peace Line -SPL) iyo hogaamiyayaasha ururrada dhallinyarada ee gobollada Hiiraan iyo shabeelada dhexe, waxaa ka soo baxay go'aammo iyo ballanqaadyo muhiim ah. Waxaana kamid ahaa:

Ujeedada ballanqaadkan waa abuurista jawi loo dhanyahay, taaso dhallinyaradu fursad u helayaan inay ka qeyb-qaataan howlaha bulshada ayna gacan ka gaystaan hormarka deegaanka. Wixii faahfaahin dheeri ah, waxaaga kaga bogan kartaa bogga 35.

- Odayaal dhaqameedku waxay ballan qaadeen inay la shaqeynayaan dhallinyarada ulana shaqaymayaan si is kumid ah iyadoon la eegaynin jinsigooda. Waxay si joogta ah u tababari doonaan dhallinyarada una diyaarin doonaan inay bulshada hogaaminteeda wax ku yeeshaan. Ballanqaadkan wuxuu caddaynayaa muhiimadda wada shaqeynta jiilalka kala duwan iyo inay dhallinyaradu kamid yihiin hantida bulshada leedahay iyo hormarkooda.
- Xildhibaanada baarlamaanka Koonfur Galbeed oo isku xilqaamay xoojinta xiriirka baarlamaanka iyo dhalinyarada. Go'aanka iyo ballanqaadkan wuxuu xoojinayaa aragtida dowladda ee ah in ay abuurto fursad ay dhallinyaradu qeyb kaga noqdaan hogaaminta dowladdaha hoose. Ujeedka dowladdu ka leedahay samaynta doorashadan waa sare u qaadista kaqeyb galka dhallinyarada ee hannaanka go'aan gaarista iyo inay awood u yeeshaan inay bulshadooda wax kusoo kordhiyaan.



Mogadishu, 17 December 2023



Mogadishu, 17 December 2023

## *Madasha heer qaran ee dhallinyarada, doorashooyinka iyo dimuqraadiyaynta*
## **Mogadishu, 17 December 2023**

**MADASHA HEER QARAN** oo ay soo wada agaasimeen hay'adda FBA iyo UNFPA , iyo wasaaradda dhallinyarada iyo ciyaaraha Soomaaliya wuxuu ujeedkiisu ahaa isu keenista daneeyayaasha kala duwan si ay uga doodaan ugana baaraan-degaan ka-qaybgalka siyaasadda ee dhallinyarada, kadib doorashooyinka dalka.

Guddiga qorsheynta madashan oo ka koobnaa wakiillo matalayay dhallinyarada oo ka kala socday dowlad-goboleedyada Soomaaliyeed iyo gobolka Banaadir ayaa door muhiim ah ka qaatay qaban-qaabada madashan dood-wadaagga ahayd.

Madashu waxay ahayd fagaare lagu soo bandhigay natiijooyinkii iyo talooyinkii ka soo baxay shirar taxane ahaa oo la qabtay intii u dhaxeysay 2022-2023 kana dhacay dhammaan dowlad goboleedyada Soomaaliya iyo gobolka Banaadir. Kulamadii hore waxaa diiradda lagu saaray uruurinta aragtiyo ku saabsan fursadaha iyo caqabadaha la xiriira ka qaybgalka siyaasadda ee dhallinyarada Soomaaliyeed, waxayna natiijadii kasoo baxday shirarakaas loo soo gudbiyay heer qaran.

Madasha Qaran ayaa kulmisay dad kala duwan oo ka soo qeyb galay, sida mas'uuliyiin ka tirsan dowladda, ururro ay hormuud u yihiin dhallinyaradu, kuwa ka shaqeeeya arrimaha dhallinyarada, iyo jilayaasha caalamiga ah. Ujeeddadu waxay ahayd in la kobciyo wada-hadal iyo wada-shaqeyn macno leh oo dhexmara daneeyayaashan si loo fududeeyo hannaanka dimuqraadiyeynta loo dhan yahay ee Soomaaliya dhalinyaraduna qeyb ka tahay.

Madashan oo isugu yeertay jilayaasha muhiimka ah isla markaana lagu soo bandhigay waxyaabihii ka soo baxay shirarkii hore, ayaa waxay ujeeddadeedu ahayd in la helo madal lagu falanqeeyo aragtiyada iyo xeeladaha lagu horumarina karo ka-qeybgalka siyaasadda ee dhallinyarada Soomaaliyeed. Ujeeddadu waxay ahayd in la kobciyo wada-hadal iyo wada-shaqeyn macno leh oo dhexmara daneeyayaashan si loo fududeeyo geeddi-socodka dimuqraadiyeynta Soomaaliya oo  ay dhallinyaraduna qeyb katahay.

# *Maxay tahay sababta ay dhallinyaradu* **uga qeyb qaadanayaan hannaanka doorashada?**

**KA QEYB-QAADASHADA** dhalinyarada ee hannaanka doorashada waa xaq dimuqraaddiyadeed, taariikh ahaanna dhallinyaradu waxay muujiyeen ayna qeyb ka noqdeen iney bulshada u sameeyaan isbeddel wanaagsan. Ka qeyb-qaadashadooda arrimaha doorashooyinka wuxuu faa'iido u leeyahay hormarka dalalka. Saddex sababood oo ay muhiim u tahay ka qeyb qaadashada dhalinyarada ee geeddi-socodka doorashada iyo hanaanka go'aan gaarista waa:



### *1. Tirikoobka Dadka (demographics)*

Soomaaliya dhallinyaradu waa tirada ugu badan ee bulshada, balse waxaa si joogto ah looga saaraa hannaanka go'aan gaarista waxaana loola dhaqmaa sida dad laga tiro badan yahay. Si loo helo hannaan loo dhanyahay oo siyaasadeed, waa in dhammaan qeybaha bulshada helaan fursad ay uga qeyb qaataan arrimaha siyaasadda. Haddii laga saaro dhalinyarada, macnaheedu waa in qeyb weyn oo bulshadii kamid ah ayna go'aanada saamaynaya ku lahayn cod.

### *2. Dimuqraadiyadda iyo Xuquuqda Aadanaha.*

Ka qeyb qaadashada arrimaha siyaasadda ee loo dhanyahay waa xaq aasaasi ah iyo mid dimuqraadi ah. Waa xuquuq ay leeyihiin dhallinyaradu in loo tixgaliyo codkooda dhammaan arrimaha saamaynta tooska ah iyo midda aan tooska ahaynba ku leh noloshooda iyo mustaqbalkooda. Waxaa jira habdhisyo caalami ah , dukumentiyo iyo qaraaro xoojinaya arrimahan, waxaana kamid ah:

- Baaqa caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka (1948) wuxuu xoojinayaa "xuquuqda qof kasta uu u leeyahay in uu ka qayb qaato dawladda waddankiisa, si toos ah ama wakiillo si xor ah loo soo doortay"[4]

---

[4] udhr.pdf (un.org)

- Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda (ICCPR, 1976) qodobkiia 25-aad ee khuseeya doorashooyinka iyo dowladda oo sheegaya in "Muwaadin kastaa uu xaq iyo fursad uleeyahay- haddii aysan jirin sabab macquul ah oo looga reebo- inuu wax doorto ama la doorto doorashooyink wakhtiga leh, taasoo ah cod bixinta qarsoodiga ah ee sanduuqa doorashada, dammaanadna qaadaya doorashada xorta ah ee codbixiyaha."[5] Soomaaliya waxay ansixisay ICCPR 24tii Janaayo 1990.
- Waxaa jira heshiisyo is af-garad oo heer goboleed ah, sheegayana xaqqa dhallinyaradu u leeyihiiin inay ka qeyb-qaataan siyaasadda. Tusaale, Axdiga Afrika ee dumuqraadiyadda, doorashooyinka iyo maamulka, qodobkiisa 31aad wuxuu sheegayaa " Xisbiyada dowladdu waa inay sare u qaadaan ka qayb-galka kooxaha bulshada ee leh baahiyaha gaarka ah, oo ay ku jiraan dhallinyarada iyo dadka laxaadka la', si ay uga qayb galaan hannaanka dowladnimada"[6] Soomaaliya waxay saxiixday axdigan 28 Janaayo 2023.
- Qodobka 22aad ee dastuurka ku meel gaadhka ah ee Soomaaliya wuxuu dhigayaa in muwaadin kastaa uu xaq u leeyahay inuu ka qayb galo hawlaha guud oo ay kamid yihiin xaqa uu u leeyahay inuu xisbiyo siyaasadeed samaysto iyo ka qayb galka hawlaha ururrada siyaasadeed iyo xaqqa uu u leeyahay in loo doorto jago walba oo xisbiga gudihiisa ah. Waxaa kaloo lagu sheegay dastuurka in muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha uu sharcigu sheegay uu xaq u leeyahay inuu wax dooran karo, lana dooran karo.[7]



### *3. joogteynta (Sustainability)*

Ka-qaybgalka dhallinyarada ee geeddi-socodyada siyaasadda iyo doorashooyinka waxay bulshada uleedahay saamayn togan iyo natiijo wanaagsan. Waxay sidoo kale muhiim u tahay dhisidda bulshooyin xasilloon, hormarinta qawaaniin iyo xeerar ka turjumaya baahida dhalinyarada rag iyo dumarba. Ka-qaybgalka dhalinyaradu wuxuu sidoo kale muhiim u yahay sharciyadda nidaamka iyo xukuumadda, maadaama ay suuragal tahay in xeerarka, shuruucda, iyo nabadayn-tuba ka jawaabi doonaan arrimaha dhalinyarada, aragtidooda, iyo baahidooda. Ka qeybgalka balaadhan wuxuu kordhin karaa suuragalnimada hirgalinta maadama dadku rabi doonaan wixii ay u codeeyaan inay arkaan natiijadiisa.

---

[5] Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda | OHHR
[6] Axdiga Afrika ee dimuqraadiyadda, doorashooyinka iyo xukunka | African Union (au.int)
[7] Dastuurka Soomaalia ( Somalia-Constitution2012.pdf "umn.edu")

## *Heerka ka qaybgalka doorashooyinka* **ee dhallinyarada Soomaaliyeed**

**SANADIHII LA SOO DHAAFAY**, Gabadhaha iyo wiilasha dhallinyarada ah waxay bilaabeen inay door muhiim ah ka qaataan arrimaha siyaasadda iyo doorashooyinka Soomaaliya. in kastoo ay jiraan horumar laga gaaray dhinaca matalaadda, haddana hannaanka go'aan qaadashada siyaasadeed ee hadda jira waxaa hogaanka u haya siyaasiyiin, iyadoo laga saaray dhallinyaradii ka qayb galka siyaasadeed.

Qaybo badan oo ka mid ah dhallinyarada Soomaaliyeed waxay muddo dheer doonayeen doorashooyin dimuqraadi ah oo toos ah laakiin si joogto ah ayaa loo diidaa inay codeeyaan iyo inay xilka ugu tartamaan doorasho qof iyo cod ah, heer federaal, mid maamul-goboleedyada iyo mid degmaba.

Bulshada Soomaaliyeed 81% waxay ka yar yihiin 35 sano jir.[8] Iyadoo taasi jirto, heerka ka qey-bgalka dhalinyarada iyo matalaadda heer qaran waa mid aad u hoosaysa ama aan jirinba, mana jirto wax tallaabo ah oo laga qaaday kuna saabsan dhalinyarada iyo ka qeyb-galkooda nidaamyada rasmiga ah ee dimuqraadiyadda doorashooyinka.

Sida ay dhallinyarada badankooda muujiyeenayeen intii ay socdeen aragti is weydarsigu, geeddi socodka siyaasadda iyo doorashooyinka Soomaaliya waxaa ku badan odayaal, kuwaasoo isku daya inay takooraan dhallinyarada, si gaar ah gabadhaha iyo kuwa kasoo jeeda bulshooyinka la hayb sooco. Nidaamkan gudahiisa, fursadaha ay dhallinyaradu kaga qayb qaadan karaan arrimahan muhiim ka ah waa mid hooseeya. Haddiiba ay dhacdo inay ka qeyb galaanna, waxay daacad u yihiin danaha qabiilka, taas oo xaddidaysa suurtagalnimada dhallinyarada inay gacan ka gaystaan arimaha dhalinyaradaiyo inay saamayn ku yeeshaan doodaha siyaasadaha dalka.

> *"Dhalinyaradu waa kuwo leh hala-buur iyo garasho, waana fursad weyn iyo hanti bulshadu leedahay. Haddii dhallinyarada Galmudug la taageero, lana maalgaliyo, waxay awoodi doonaan inay hirgaliyaan waxyaabo aysan dadka waaweyn samayn waayeen tobanaan sano"*
> – Mid kamid ah dhallinyarada Galmudug.

Intaa waxaa sii dheer, xilliyada kooban ee ay dhalinyaradu helaan mataaladda siyaasadeed, fursadahaas waxay ku kooban yihiin dhallinyarada muuqda, sida kuwa maal-qabeenada ama qurba-joogta ah oo mararka qaar la siiyo xilal siyaasadeed. Si kastaba ha ahaatee, inta badan dhalinyarada, gaar ahaan kuwa kasoo jeeda beelaha la hayb-sooco, ma helaan fursad waxaana ugu wacan nidaamka qabiilka oo u xagliya qabiillada tirada badan ama awoodda leh.

[8] Siyaasadda Qaran ee Dhallinyarada (2023 – 2030)

# Natiijooyinkii shirarka

**NATIIJOOYINKA KA SOO** baxay kulamadii lala yeeshay dhallinyada ka kala timid daafaha Soomaaliya ayaa lagu sheegay caqabaha ka hortaagan ka qeybgalka dhallinyarada ee arrimaha doorashooyinka.

## *Caqabadahaas* waxaa ka mid ah:

1. **Maqnaanasha doorsho xor iyo xalaal oo diquqraadi ah:** Nidaamka ku saleysan qabiilka ee hadda jira waxaa loo arkaa mid dhallinyarta hayb soocaya, gaar ahaan kuwa kasoo jeeda qabaa'ilka laga tirada badan yahay. Dhallinyaradu waxay u aragtaa in nidaamkani uu yahay mid hortaagan ka qeybgalkooda doorashooyinka, waxayna xoojinayaan in baahi loo qabo horumarinta nidaamka hadda jira si loo xaqiijiyo ka qaybgalka dhallinyarada ee siyaasadda.
2. **Saamaynta Odayaal dhaqameedka:** Dhallinyaradu waxay ku doodayaan in yaraynta saameynta doorka odayaasha dhaqanka ay ku yeeshaan hannaanka doorashada iyo siyaasadda ay aad muhiim ugu tahay xaqiijinta himilada dhallinyarada. Waxay aaminsan yihiin in matalaad mug weyn oo dhallinyaradu helaan ay ku xidhantahy dhimista saamaynta odayaasha qabaa'ilka.
3. **Takoorista da'da ku saleysan:** Dhallinyaradu waxay waajahaan takoorid ku saleysan da'da, iyadoo dhowr qodob oo ku qoran dastuurka ku meel gaarka ah loo arko inay ku salaysan yihiin takoorista da'da. In laga saaro qodobbadan takoorka ah waxay dhallinyaradu u arkaan inay yihiin kuwa muhiim u ah horumarinta iyo qeybgalka dhallinyarada ee hannaanka doorashooyinka dalka.
4. **Maqnaanshaha hannaan sharci oo cad:** Xeerarka qaran iyo kuwa dowlad-goboleedyadaba ayaa lagu tilmaamaa kuwo aan is-waafaqsanayn, jahwareerna ku jiro, aana taageeraynin dhallinyarada. Waxay dhallinyaradu carabka ku adkeeyeen muhiimadda ay leedahay ka qaybgalka dhallinyarada ee geeddi-socodka dib-u-eegista dastuurka si wax looga qabto arrimahan.
5. **Amni-darrada**: Amni darrada ka jirta meelo badan oo ka mid ah Soomaaliya ayaa caqabad weyn ku ah ka qaybgalka dhallinyarada ee siyaasadda. Gabdhaha dhallinyarada ah gaar ahaan, waxay wajahaan khataro dhinaca amniga ah oo kaga yimaada kooxaha hubeysan sida Al-Shabaab, taas oo ka dhigaysa in kaqeybgalkooda siyaasadda uu yahay mid adag.
6. **Aaminaadda aragtiyo khaldan:** aaminadda aan xaqiiqada ku dhisneyn ee taban ee ku wajahan dhalinyarada waxay caqbad ku yihiin fursadaha ay kaga qeyb gali karaan siyaasadda. Dhalinyaradu waxay ku doodayaan aaminadda aragtiyaha aan xaqiiqada salka ku heynin inay qeyb weyn ka yihiiin in loo arko inay yihiin dhibaato halkii loo arki lahaa fursad iyo hanti bulsho.
7. **Wacyi gelin la'aan/aqoon:** Wacyigelinta xaddidan ee loo sameeyo dhallinyarada ee ku saabsan muhiimadda ay leedahay doorashooyinka, dimuqraadiyadda, iyo waajibaadyadooda iyo xuquuqdooda madaniga ahi waxay cabaqad ku tahay ka qaybgalka ay dhallinyaradu ka qayb galaan geedi-socodka doorashooyinka dalka. Dhalinyaradu waxay u arkaan in in Wacyigelinta iyo aqoon-dhiskoodu ay muhiim u tahay kor u qaadida ka qayb-gallka dhalinyarada ee arrimaha siyaasadda.

8. **Maqnaanshaha ururo siyaasadeed:** Maqnaanshaha axsaabta siyaasadeed ama kuwo dhallinyaro waxay adkaynaysaa in wax laga qabto baahida iyo danaha da'yarta. Waxay dhallinyaradu ku baaqeen muhimadda ay leedahay abuurista madallo siyaasadeed oo ka tarjumaysa aragtidooda.

9. **Dhaqaalo la'aan:** Kharashaadka qaaliga ah ee ololaha doorashada iyo awooda dhaqaale ee dhallinyarada oo xaddidan ayaa dhibaato weyn ku ah helitaanka taageerada ka-qaybgalka siyaasadda ee dhallinyarada, gaar ahaan kuwa kasoo jeeda qabaa'ilka laga tirada badan yahay.

10. **Awoodda oo uursan**: Hannaanka doorasho ee hadda jira, wuxuu ku uruursan yahay Muqdisho, arrintan ayaa horseedeysa inay dhalinyaradu dareemaan in laga saarayo hannaanka doorasho ee ka jira dowlad goboleedyada.. Awooddan uruursan waxay keentay niyad jab ku yimaada dhallinyaradii iyo danayn la'aan.

11. **Shaqo la'aan:** Shaqo la'aanta baahsan ee dhallinyarada waxay qeyb weyn ka qaadatay hoos u dhaca rajooyinka iyo himillooyinka ay ka lahaayeen dhalinyaradu ka qaybgalka siyaasadda. Wax ka qabashada shaqo la'aanta waxaa loo arkaa inay muhiim u tahay sare u qaadidda ka qaybgalka dhallinyarada ee arrimaha doorashooyinka.

## *Caqabado u gaar ah Gabdhaha* **dhallinyarada ah**

**DHALINYARO BADAN AYAA** ku tilmaamay in nidaamka siyaasadeed ee Soomaaliya uu yahay mid ragga mudnaanta siiya, islamarkaana liida haweenka, gaar ahaan haweenka da'da yar. Gabdhuhu waxay ku doodeen inay tani u sabab tahay hoggaamiyayaal dhaqameedka oo ragga ka door bida haweenka, dadka waaweynna ka door bidaan kuwa da'da yar, hab dhaqankan ayaa sababay in gabdhaha dhalinyarada ah laga saaro hannaanka siyaasadda dalka. Inta badan haweenka dhallinyarada ahi waxay muujiyeenin dadka ka tirsan beelaha laga tirada badan yahay si gaar ah loo dayacay.

> *"Caadooyinka dhaqameed iyo kuwa bulsho ee sheegaya in dumarku ay guriga joogaan, siyaasadduna ay tahay wax xun, haweenkuna aysan ku biiri karin waxay caqabad ku tahay ka qaybgalka gabdhaha ee siyaasadda."*
>
> – Gabadh ku nool Jubbaland.

Dhanka Galmudug, gabdhaha waxay walaac ka muujiyeen ineysan helin waxbarasho, taas oo ay ku doodeen inay ka hor istaagayso la tartamidda wiilasha dhanka jagooyinka siyaasadda iyo hogaaminta. Waxa ay hoosta ka xarriiqeen in xitaa marka dumarka aqoonta leh ay la tartamaan ragga aan aqoonta lahayn, in bulshadu ay doorato musharaxa labka ah. Taasi waxay muujinaysaa kala-duwanaansho jinsiga oo abuuraya kala duwanaan xagga fursadaha siyaasadeed ah.

Intaas waxaa sii dheer, gabdhaha dhallinyarada ahi waxay sheegeen inaysan helin tababarro ku saabsan muhiimadda ay leedahay ka qayb galka siyaasadda

> *"Odayaasha dhaqanka waa niman kaliya; marka laga hadlayo arrimaha haweenka ku lugta leh, dumarku waa in ay joogaan halka lagaga hadlayo arrimaha dumarka. Raggu ma qaadan karaan go'aanno ayaga oo wakiil ka ah dumarka."*
>
> – Gabadha ku nool Koonfur-galbeed.

iyo doorashooyinka, taas oo si taban u saamaynaysa awooddooda ay ku yeelan karaan hannaanka siyaasaddda. Dumar badan oo dhallinyaro ah ma oga xuquuq-dooda iyo mas'uuliyadaha madaniga ah ee saaran, waxayna sii xaddidaysaa fursadaha uga qaybgali karaan siyaasadda.

Qodobada kale ee muhiimka ah ee ay sheegeen gabdhuha dhallinyarada ahi waa kala-duwanaanshaha xagga lahaansha xirriro siyaasadeed iyo shabakado. Waxay ku sheegeen in gabdhaha dhallinyarada ahi aysan heli Karin fursadda raggu haysataan ee ah helitaanka xiriirrada siyaasadeed oo saameynta leh, taasoo xaddidaysa fursadaha inay dumarku raadsadaan jagooyin siyaasadeed.

Madashiii Hirshabelle, iyo kuwii kalaba, gabadhaha dhallinyarada ah ayaa iftiimiyay in amni-darrada iyo qalalaasaha siyaasadeed ee Soomaaliya ay ka hor istaagaan ka qeybgalkooda siyaasadeed. Waxay sheegeen in amni darrada si gaar ah u saameysay gabdhaha dhalinyarada ah, kuwa siyaasadda ka qeybgalana ay halis dhanka amniga ah kala kulmaan kooxaha kala duwan sida Al-Shabaab.

Si kastaba ha ahaatee, ma ahan keliya khataraha amniga dibadda in ay ka walaacsan yihiin gabadhuhu; waxaa jira saamayn xagga aragtida bulshada ah, gaar ahaan dumarka ku lugta leh siyaasadda. Waxay walaac ka muujiyeen saamaynta taban ee dhalata sida guurka oo hagaagi waaya, kufsiga iyo sharaf dhac lagu tilmaamo gaar ahaaan markay kusoo daahdo shirar, is dhexgalka ragga iyo ku milanka siyaasiyiinta.

Waxaa kale oo dhallinyaradu sheegeen in isbed-bedelka qabiilku ay kaalin weyn ka qaataan matalaadda siyaasadeed. Waxay xuseen in haddii haweeney ay guursato beel kale, inaysan matali karin beesheeda iyo beeshii ay u dhaxday toona. Taasoo sii xaddidadaysa fursadaha ka qeybgalka dumarka ee siyaasadda.

Si guud ahaanaan, arrimahan kala duwan ee ay xuseen gabdhaha dhallinyarada ah ee reer Galmudug iyo Hirshabeelle ayaa iftiiminaya caqabadaha kala duwan ee ay dumarku wajahayaan marka ay timaaddo ka qayb galka hannaanka siyaasadeed ee dalka. Si kooban caqabadaha la xusay

> *"Gabdhaha da'da yar waxaa laga saaray hannaanka go'aan qaadashada doorashooyinka ee Soomaaliya. Odayaasha qabaa'ilka iyo hogaamiyeyaasha siyaasadeed waa inay billaabaan taageerada ay siiyaan gabdhaha dhalinyaradda ah ee doonaya inay ka qayb galaan siyaasadda"*
>
> – Gabadh oo ku nool Hirshabelle.

waxaa kamid ahaa; kala duwanaanshaha heerka waxbarasho ee ragga iyo dumarka, tababarrada oo kooban, eex iyo faquuq ku saleysan jinsiga, amni darro, iyo filashada bulshada. Wax ka qabashada arimaha kor ku xusan waxay suurta galineysa in la horumariyo sinaanta ragga iyo dumarka iyo hirgalinta hannaan siyaasadeed oo loo dhanyahay oo ka hanaqaada Soomaaliya.

Labada maamul ee Puntland iyo Galmudug, dhallinyaradu waxay ku doodeen in hirgelinta qoondada haweenka ee 30% ay xaqiijin doonto matalaadda haweenka ee heerarka go'aan gaarista. Waxay garwaaqsadeen in gaaritaanka yoolkan uu u baahan yahay doonis siyaasadeed oo ka timaada  hogaamiyayaasha kala duwan, waxayna rajo ka muujiyeen in qoondadaasi laga hirgalin doono  baarlamaanka iyo aqalka sare. Waxaa kale oo ay xuseen muhiimadda ay ururrada haweenku hoggaamiyaan ay u leeyihiin u doodista xuquuqda haweenka ee siyaasadda iyo inay xoojiyaan ka qaybgalkooda hannaanka siyaasadeed iyo kuwa doorashooyinka.

Haddii aan soo koobno, dhallinyarada kala jooga dhammaan Dowlad goboleedyada Soomaaliya, iyo gobolka Banaadir, ayaa isla qiray in nidaamka siyaasadda ee hadda jira uu ka saarayo haweenka ka qeybgalka siyaasadda Soomaaliya, iyadoo ay si gaar ah u saameysay gabdhaha dhallinyarada ah. Waxay tilmaameen in haweenka dhallinyarada ah ay wajahayaan caqabado ka badan kuwan wiilasha dhallinyarada ah marka loo eego helitaanka xogta, fursadaha iyo taageerada dhaqaale. Intaas waxaa dheer, waxay la kulmaan khataro kala duwan oo dhinaca amniga ah. Caqabadahan waxaala socda noocyada kale ee takoorka oo dumarka lagu sameeyo, iyo arrimo kale oo saameyntooda leh sida waxbarashada, xaaladda dhaqan-dhaqaale, diinta, iyo qabiilka, kuwaasoo uga sii dara caqabadaha ay wajahayaan gabdhaha dhaliinyarada ah dhanka ka qaybgalka siyaasadda.

# Taloooyin

**INTA LAGU GUDA JIRAY** shirarkan, dhallinyaradu waxay talooyin dhowr ah u soo jeediyeen saamileyda kala duwan ee ay khuseeyaan, ujeedkooduna yahay in sare loo qaado fursadaha dhalinyarada si ay uga qaybgalaan hannaanka go'aan-gaarista ee doorashooyinka iyo siyaasadda. Talooyinkaas waxaa ka mid ahaa:

**Xisbiyada Siyaasaddu waa in ay:**

- Diyaariyaan hab lagu taageero dhallinyarada, gaar ahaan gabdhah da'da yar xilliga ololaha.
- Taageeraan ka qaybgalka dhallinyarada ee kor joogtada doorashooyinka.
- Hubiyaan ka qaybgalka dhallinyarada ee dhammaan marxaladaha ololaha waxbarista cod bixiyeyaasha.
- Horumariyaan garabka dhallinyarada ee xisbiyadda siyaasadda.
- Taageeraan isla markaan sare u qaadan kartida xubnaha dhalinyarada ah ee xisbiyada.

**Xeer-dejinta iyo Guddiyada Doorashadana waa in ay:**

- Is waafajiyaan sharciyada doorashooyinka ee heer dowlad-goboleed iyo heer qaran, si looga fogaado iska horimaadka xeerarka.
- In la hirgaliyo doorashooyin qof iyo cod ah si ay uga tarjumaan rabitaanka shacabka, oo ay ku jiraan dhallinyaradu.
- In hoos loo dhigo da'da musharraxnimada si ay u waafaqdo da'da cod bixinta.
- Samaynta dedaallo lagu xoojinayo tayaynta dhallinyarada iyo ururada ay hormuudka ka yihiin dhallinyaradu ee arrimaha doorashada, dimuqraadiyaynta, iyo ka qayb galka bulshada.
- In la taageero dhismaha ururada siyaasadeed ee dhallinyarada ama garabyada dhallinyarada si ay uga doodaan arrimaha mudnaanta leh, danaha, iyo baahiyaha dhallinyarada.
- In dhallinyarada laga qayb geliyo qaabaynta, hirgelinta iyo la socodka hannaanka doorashada.
- Hirgelinta qoondada haweenka ee 30%.
- In la yareeyo lacagta diiwaangalinta ee dhalinyarada u tartamaya jagooyinka siyaasadeed.
- In la sameeyo qoondada dhallinyarada, sida in kuraas u gaar ah dhalinyarada looga reebo golayaasha degmooyinka iyo baarlamaanka.
- In lagu daro dhallinyarada guddiga la-talinta ee hay'adda maamulka doorashada.
- In la taageero dhismaha golayaasha dhallinyarada ee heer deegaan.
- In la sameeyo xeerka maaliyadda ee ololaha doorashada

**Odayaal dhaqameedku waa in ay:**

- Dhallinyarada u aqoonsadaan inay yihiin ka qayb galayaal muhiim u ah hannaanka dimuqraadiyadda iyo doorashooyinka, oo ay ka qayb qaataan go'aamada saameeya noloshooda.

- Taageeraan baabi'inta nidaamka awood qaybsiga ee 4.5 isla markaana dhallinyarada loo oggolaado in ay kaalin siman ku yeeshaan hannaanka doorashada.
- Ka dheeraadaan ku taageeridda musharixiinta kaliya dhaqaalahooda, maadaama ay tani keenayso in la takooro dhalinyarada, gaar ahaan haweenka iyo dhallinyarada kasoo jeeda qabiilooyinka la hayb sooco.
- Hirgaliyaan doodo u dhexeeaya jiilalka kala duwan si loo fahmo baahiyaha, arrimaha hortabinta leh , iyo rabitaanada kala duwan ee dhalinyarada.
- Aqoonsadaan aqoonta iyo waayaaragnimada gaarka ah ee dhallinyaradu leedahay iyo in la siiyo fursado ay door hoggaamineed ku helaanqaataan.
- Hirgaliyaan doodo lagu fududeynayo aragti iyo aqoon wadaag u dhaxaysa dhallinyarada iyo waayeelka.

**Dowladdu waa in ay:**

- Abuurto jawi wanaagsan oo lagu qabto wadahadal is-dhexgal ah oo joogto ah oo lala yeesho kooxo kala duwan oo dhallinyaro ah, oo ay ku jiraan dhallinyarada la hayb sooco, si loo ogaado baahiyahooda iyo arimaha hortabinta u leh.
- Sameeyso isla markaana hirgeliso qorshaha qaran ee dhallinyarada kaas oo ay ka mid yihiin qodobbada ka-qaybgalka dhallinyarada ee hannaankaa doorashooyinka.
- Ku dartaa dhalinyaro rag iyo dumarba isugu jira laamaha kala duwan ee dowladda sida guddiyada dib-u-eegista dastuurka, guddiyada doorashada, iyo guddiyada farsamada si ay ugu matalaan dhalinyarada kala duwan.
- Xaqiijisaa helitaanka jawi nabdoon oo suurgalinaya ka-qaybgalka dhallinyarada ee arimaha siyaasadda, ilaalinta xuquuqdooda xorriyadda ra'yiga, hadalka, helitaanka macluumaadka, iyo isu imaatinka nabadeed iyo ku biirista ururrada.
- Samaysaa barnaamijyo lagu wacyi-geliyo dhallinyarada Heer degmo, heer gobol iyo heer federaalba kuna saabsan waajibaadka qaran ee looga baahan yahay sare u qaadista doonistooda iyo inay ka qayb qaataan hannaanka doorashada.
- Siisaa taageero dhaqaale dalladaha dhallinyarada ee heer deegaan si ay uga qeyb-qaataan hannaanka doorashada una joogteeyaan la shaqeynta bulshada iyo dowladda.

**Dhallinyarada**

Dhallinyaradii kaso qayb gasha shirarka kala duwanaa waxay kaloo talooyin gaar ah usoo jeediyeen dhallinyarada, hay'adaha dalka, kuwa caalamiga ah, iyo Qaramada Midoobay. Sidoo kale waxay soo jeediyeen tallaabooyin kor loogu qaadayo gabdhuhu inay ka qayb galaan siyaasadda.

**Talooyinka Dhalinyarada:**

- In la dhiso xisbi siyaasadeed ama garab dhallinyaro oo ka dhex shaqeeya xisbiyada jira si ay ugu qareemaan ajenadayaasha iyo mudnaanta la siinayo dhallinyarada.
- Inay abaabulaan fagaarayaal lagu martiqaadi karo odayaasha iyo daneeyayaasha kale ee ay khusayso si aragti-wadaag loo sameeyo , looguna doodo ajendeyaasha hortabinta u leh dhallinyarada

**Talooyinka hay'adaha dalka iyo kuwa Caalamiga ah:**

- Taagerista hindiseyaasha lagu kobcinayo kartida gabadha iyo wiilasha, hindiseyaashan oo si gaar ah loogu qaabeeyay inu wax ka qabtaan baahiyaha gaarka ah ee dhalinyarada ka qabaan hanaanka dimuqraadiyadeynta iyo siyaasadda dalka, ayadoo la taabo galinayo waxay u baahnaayeen.
- In la siiyo taageero dalladaha dhalinyarada ee heerarka degmooyinka, gobollada, iyo heer qaranba.
- In la sameeyo xidhiidh ururada dhalinyarada ee bulshada iyo hay'adaha ay hogaaminayaan.
- In la cadeeeyo hab dhaqamada faquuqa ah ee caqabadda ku ah ka-qaybgalka dhallinyarada iyo in la hirgaliyo siyaasado keeni kara in dhalinyaradu si hufan uga qeyb qaataan siyaasadda.

**Talooyinka ku aaddan Qaramada Midoobay(QM):**

- Soo bandhigista natiijooyinka mashaariicda iyo barnaamijyada ay QM maalgeliso ee da'yarta.
- Maalgalinta dhallinyarada si ay uga qayb qaataan hannaanka doorashooyinka, oo ay ku jirto taageerista xisbiyada ay hoggaaminayaan dhallinyaradu ama garabka dhallinyarada ee xisbiyada.
- U ololeynta in la baabi'yo hanaanka doorasho ee aan dimoqraadiga ahayn ee hadda jira, lana taageero qorshaha dawladda ee doorashooyin toos ah.
- Qaban qaabinta isku-xirka ka dhexeeya hay'ada ka shaqeeya barnaamijyada horumarinta ee kala duwan ee taageeraya ka-qaybgalka dhallinyarada.
- Taageerista hindisayaasha kulminaya dhallinyarada iyo daneeyayaasha ka qaybqaata geedi-socodka doorashada si kor loogu qaado ka-qaybgalka loo dhan yahay.
- Xaqiijinta in la siiyo dhalinyarada taageero toos ah oo joogta ah, si gaar ah gabadhaha.
- kala xisaabtanka hogaamiyayaasha siyaasadeed, oo uu ku jiro madaxweynaha, ka-saarista dhallinyarada arrimaha siyaasadda iyo madaniga.

**Talooyin Gaar ah oo sare loogu qaadayo Ka qeybgalka Gabahdha:**

- In la siiyo fursado dumarka, gaar ahaan gabadhaha dhallinyarada ah, si ay uga qayb qaataan hanaanka go'aan-gaarista.
- In lagu booriyo qoysaska iyo odayaal dhaqameedka dhiirigalinta iyo taageerada gabdhaha ah ee ku aaddan ka qeybgalka siyaasadda.
- U qoondaynta kuraas gaar ah doorashooyinka degmooyinka iyo baarlamaanka.
- Samaynta fagaarayaal ay isticmaalaan gabdhaha doonaya inay ka qayb qaataan siyaasadda.
- In gabdhaha dhallinyarada ah ay xubno ka noqdaan guddiga doorashooyinka.
- U doodista qoondada haweenka ee 50%.
- In la hubiyo taageero joogto ah oo hortabin u ah dhalinyarada, gaar ahaan haweenka da'da yar.
- Ku dhiirigelinta gabdhaha inay isa siiyaan taageerada dhaqaale si ay isu hormariyaan iyagu.

# *Ballanqaadyo u gaar ah* **dowladgoboleed kasta**

**GEBAGABADII DOOD-WADAAGGA**, waxay dhammaan daneeyaaasha ama saamilaydu ballanqaadeen in ay sare u qaadaan isla markaana xoojiyaan fursadaha ay dhallinyaradu ku heli karaan ka qaybqaadashada geedi-socodka doorasho ee deegaankooda ay ka mas'uulka ka yihiin.

## Dowlad goboleedka Puntland:

### *Ballanqaadka Dowladda:*

- In la sameeyo xeer lana horgeeyo baarlamaanka si loogu abuuro fursad dhallinyaradu iyo in la xoojiyo ka qaybgalkooda siyaasadeed.
- In la diyaariyo jawi ku haboon, lana xoojiyo geeddi-socodka dimoqraadiyeynta, iyadoo la xaqiijinayo dhowrista xuquuqda iyo mas'uuliyadaha dhallinyarada.
- In la siiyo taageerada lagama maarmaanka u ah dhalinyarada tayayntooda iyo fursadaha shaqo.
- In laga qayb galiyo dhallinyarada arrimaha qorshaynta ee saameynta ku leh dhallinyarada Puntland.
- In dib loo eegayo lana xoojiyo siyaasadda dhallinyarada Puntland si loogu daro barnaamijyo dheeraad ah.



### *Balan qaadyadii ay sameeyeen Qaramada midoobay iyo ha`ayadaha aan dowliga aheyn ee caalimaga ah:*

Hay'adda Qaramada midoobay iyo Hay'adaha caalamiga ah ee aan dowliga aheyn waxay ballan qaadeen:

- Inay sii joogteeyaan hirgalinta doodaha ku saabsan ka qeyb noqoshada dhalinyarada ee hannaanka doorashada, iyo inay taageeraan barnaamijyada u adeeggaya hirgalinta ujeedooyinkan.
- Inay la shaqeeyaan dhalinyarada heer kasta iyo in la taageero lana tayeeyo aqoontooda madaniga ah iyo tan dimuqraadiyaynta dalka.
- Ina lagala shaqeeyo dowladda sidii loo hirgalin lahaa doorasho qof iyo cod ah.

### *Ballanqaadyada guddiga ku meelgaarka ah ee Doorashooyinka Puntland (TPEC, oo hadda loo bixiyay Guddiga Doorashooyinka Puntland -PEC) :*

- In lagu daro dhallinyarada hanaanka doorashada, loona ololeeyo muhiiimada ay leeyihiiin.
- In la sameeyo loona ololeeyo barnaamijyo lagu wacyi-galinayo cod bixiyayaasha dhammaan degmooyinka puntland si dhalinyarada loo baro heerarka doorashada.




## Dowlad goboleedka Galmudug:

### *Balanqaadka Dowladda:*

- Isku-duwidda iyo dardargelinta dhammaan adeegyada loogu tala galay dadka dhallinyarada ah ee degmo kasta oo ka mid ah Galmudug si ay u gaaraan deegaannada miyiga ah.
- in mudnaanta lasiiyo ajendayaasha dhallinyarada iyo in la siiyo fursad loogu talo galay tabarista iyo kobcinta xirfadahooda.
- In la xaqiijiyo in dhallinyarada lagala tashado, ayna qeyb ka noqodaan geeddi-socodka qorshaynta ee la xidhiidha arrimaha saamenta kuleh.
- In lala shaqeeyo dhallinyarada sidii loo bari lahaa xuquuqdooda iyo waajibaadka saaran.

### *Balanqaadka Hay'adda Qarama Midoobay iyo hay'adaha aan dowliga aheyn ee caalamiga ah:*

- In lala shaqeeyo ururada ay hormuudka ka yihiin dhalinyarada iyo mas'uuliyiinta Galmudug si ay u taageeraan baahiyaha dhallinyarada.
- In la sii wado la shaqeynta dowladda si loo xaqiijiyo in doorasho qof iyo cod ah ay ka qabsoonto Soomaaliya.
- In la taageero ajenadayaasha dawladda iyo arimaha mudnaanta u leh ee la xidhiidha ka-qaybgalka dhallinyarada ee doorashooyinka.

### *Balanqaadka Odayaal dhaqameedka:*

- Siinta dhalinyarada fursad iyo in loola dhaqmo iney yihiin jilaayaal muhiim ah bulshada dhexdeeda.
- In la siiyo dhalinyarad fursad ay aragtidooda kula wadaagaan hoggaamiyeyaasha bulshada, hoggaamiyayaasha diinta, iyo dadka saamaynta ku leh go'aannada.
- In wakiillada dhalinyaradu ay qayb ka noqdaan wada-xaajoodka siyaasadeed.
- In la sii joogteeyo doodaha u dhaxeeya jiilalka kala duwan si loo helo is-dhexgal bulsho isla markaana wax looga qabto rabitaanka dhallinyarada, rejada, aragtida, iyo walaacyada ay qabaan.




## Dowlad Gobleedka Jubaland:

### *Balanqaadka Dowadda:*

- In la siiyo dhallinyarada furshad ay uga qayb qaataan arrimaha bulshada, dimuqraadiyaynta, iyo dhismaha nabadda.
- In dhalinyarada lagu daro dhismaha guddiga runta iyo cadaaaladda.

### *Balanqaadka Hay'adda Qaramada midoobay iyo hay'adaha aan dowliga aheyn ee caalamiga ah:*

- In la siiyo taageero dhaqaale hindisayaasha ay dhallinyaradu hormuudka ka yihiin, kaas oo dhiirigelinaya ka qaybgalka doorashooyinka iyo arrimaha madaniga ah.
- Ka taageerista dowladda ee sare u qaadista hay'adaha taageera dhallinyarada iyo maalgalinta barnaamijyo kor loogu qaadayo tayada dhalinyarada.

### *Balanqaadka Odayaal dhaqmeedka:*

- In la xaqiijyo in dhallinyaradu helaan fursado ay kaga qayb-qaadan karaan hannaanka go'aan-gaarista ee arrimaha Soomaaliya.
- In la sii wado doodaha is-dhex-galka jiilalka kala duwan si loo yareeyo khilaafka u dhaxaya dhallinyarada iyo dadka waawen.
- In oday dhaqameedyadu al-baabada u furaan dhalinyarada si ay u yeeshaan doodwadaag joogto ah.




## Goboolka Benadir:

### *Balanqaadka xagga dowladda:*

- U ololeynta  ka qaybgalka siyaasadeed ee dhallinyarada oo heer kasta leh.
- In ay si dhow ula shaqeeyaan dhalinyarada oo ay dhageystaan walaacooda.

### *Balanqaadka Hay'adda Qaramada Midoobay iyo Hay'adaha aan Dowliga aheyn ee Caalamiga ah:*

- Inay taageeraan shirar ay dhallinyaradu isugu yimaadaan, ayna ku dajinayaan aragtiyada, iyo inay la doodaan kuwa shuruucda sameeya.
- Inay taageeraan aqoon-dhisidda dhallinyarada, khaas ahaan iyadoo loo la hormarinayo ururrada ay dhallinyaradu hogaamiyaan.
- Iney u ololeeyaan ka qaybgalka siyaasadda dhallinyarada, oo ay ku jiraan gabdhaha, dhallinyarada la hayb-sooco, iyo kuwa baahiyaha gaarka ah qaba.



## Dowlad goboleedka Koonfur galbeed:

### *Ballanqaadka Odayaal dhaqameedka:*

- In lala shaqeeyo dhalinyarada si isku mid ah, iyadoon la isku takooraynin jinsiga iyo da'da.
- Inay dhegaystaan cabashada gabdha-hadhallinyarada ah, albaabadoodana u furnaadaan
- Inay ka dhabeeyaan ballanqaadyada mudanayaasha Baarlamaanka inay ku darayaan.
- In la xoojiyo xiriirka ka dhaxeeya baar-lamaanka iyo dhallinyarada.

### *Balanqaadka Dowladda:*

- In la xoojiyo dhallinyarada awoodooda iyadaoo loo marayo Wasaaradda Dhal-linyarada iyo Ciyaaraha.
- In doorashooyinka golaha deegaanka laga qayb geliyo dhallinyarada iyada oo la marayo Wasaaradda Arrimaha Gudaha.



## Dowlad Goboleedka Hirshabeelle:

### *Ballanqaadka Odayaal dhaqameedka:*

- Iney si daah furanoo dhow ula shaqeeyaan dhalinyarada , ayadoon loo eegeyn jinsiga.
- Iney ku tababbaraaan dhallinyarada doorarka hoggaamineed ee bulshada dhexdeeda.

### *Ballanqaadka dowladda:*

- Warbaahinta dowladda waa in tabin ku filan looga sameeyaa arrimaha la xiriira dhalinyada iyadoo loo sii marayo Wasiir ku Xigeenka Warfaafinta.
- In la darso suurtagalnimada qoondaynta lacagaha hormarinta dhallinyarada iyadoo loo marayo Wasiir-ku-xigeenka Maaliyadda.
- In la taageero doorashooyinka hogaamiyayaasha dhallinyarada ee heer degmo ee dhammaan degmooyinka dowlad goboleedka Hirshabeelle iyada oo la adeegsanayo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Dhallinyarada.
- In dhallinyarada lagu martiqaado xafiisyada dowladda ee adeeg bxinta si ay u bartaan habsimi socodka hawlaha dowladda iyadoo lasii marayoa  Duqa magaalada Jowhar.

UNFPA

FBA